



Dibedda u bax ee soo wareeg

Adduunka wuxuu leeyahay ereyoyin badan oo xiiso leh iyo waxyaabo aad samayn kartid, dareemi kartid ama raadin kartid, ha noqdaan baakadka badarka lagu quraacdo iyo tilmaamoyinka waddada ilaa biiyo balli ah iyo caleemaha dhacey.

Ku dhirrigeli ilmahaada inay baaraan dunida ku heeraaro.

- Isla socda iyo ka wada hadla xarafyada, ereyoyinka iyo lambarada tilmaamada waddada iyo dukaamada hortooda ku qoran.
- Markii aad cunto soo iibsanyiin, is bar-bardhiga cabbirka, midabyada iyo urka miraha iyo qudaarta.



Miyaad ogeed in soo lugeynta uu ilmahaada ku caawiyo wax barashada. Ku soco isla xawaaraha ilmahaada, la sheekayso iyo xiiso ka muuji waxyaabaha ay arkaan iyo wax ka weydiiyaan.

Sida loo sameeyo iyo isticmaalo kaararka sawirada leh ee ku xiran giiran fure

Waxa aad u baahah tahay

- Qalin iyo xaashi ee liiskaaga wax iibsashada
- Sawirada miraha iyo qudaarta
- Maqaska carruurta ku ciyaaraan
- Qalabka daloolaha lagu sameeyo
- Xirig si aad isku xirto kararka sawirada

Waxaad sameynayso

Hel hab cunto karin iyo samey liiska alaabta aad u baahan tahay inaad soo iibsato adigoo majallada iyo joornalada ka goynaayo sawirada maaddooyinka uu cuntadaas ka kooban yahay.

Samee giiran fure adigoo dalool ka dhax sameynaayo hal gees ka mid ah sawir walba iyo xiriga isticmaal si aad isku xirto.

U oggolow ilmahaada inuu isticmaalo giiranka furaha markaad soo adeegayso. Sawirada waxay ku caawin doonaan inuu aqoonsado cuntada loo baahan yahay in la soo iibiyo. Ka wada hadla waxaad arkeysiiin iyo isla tiriya imisa aad u baahan tihiin.

Talada xiddigta

Kaararka sawirada leh ee ku xiran giiran fure ayaa ah hab fican aad la ciyaari kartid ilmahaada. Isku day inaad sameyso giiran fure ee ku xiran kaarar ku sawiran waxyaabaha aad arki kartid markaad banaanka u baxdo.

Fikrada sheekaysiga

Markaad dibedda la joogto ilmahaada, dhegeyso dhawaaqa aad maqli kartid, ay ku jirto buuqa baabuurta, seeriyada, musikada, qeylada eyaha, heesaha shimbirada iyo diyaaradaha cirka ku duulo. Ka hadal waxaa aad maqasho. Isku day inaad dib u sameyso dhawaaqaas – miyaad samayn kartaa isla dhawaaqa?